AWB

Asxaabta Walaalaha Buulaay

AWB

Asxaabta Walaalaha Buulaay

# WARBIXIN SANNADEED

**WAXQABADKA HEY'ADDA SAMAFALKA EE ASXAABTA WALAALAHA BUULAAY (ASW)**

**May 2025**

# 1. Hordhac

Warbixintani waxay soo bandhigaysaa waxqabadka Hey'adda Samafalka ee Asxaabta Walaalaha Buulaay (AWB), waxay adiiradda saareysaa waxyaabihii la qabtay muddadii ay hey'addu jirtay., guulihii la gaaray iyo caqabadihii la soo gudboonaaday. Waxaa kaloo ay si kooban u soo bandhigaysaa horumarka laga gaaray mashaariicda hadda la fulinayo iyo qorshaha hey'adda ee sannadaha soo socda.

## 1.1. Xaaladda guud

Dagaalladii sokeeye ee ka dhacay Soomaaliya soddonkii sano ee ugu dambeeyay, ma aysan sababin oo keliya inuu dalku burburo, laakiin waxay keeneen burbur bulsho oo ballaaran iyo xadgudubyo waaweyn oo loo geystay dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan dadka nugul, kuwa aan hubeysneyn iyo kuwa laga tirada badan yahay. Dagaalladani waxay isbedel xoog leh ku keeneen dhaqanka dadka iyo qaabdhismeedkii bulshada Soomaaliyeed waxaana ka dhashay caadooyin iyo dhaqanno cusub oo saameyn ku yeeshay dhaqankii suubannaa ee Soomaalida iyo damiirka bulshadaba. Waxaa soo baxay waxyaabo cusub oo aan Soomaali dhaqan u ahaan jirin.

Waxaa lumay miisaankii lagu kala saari jiray xumaanta iyo samaanta, wixii ammaanta ahaan jiray waxay isku beddeleen caay, wixii xumaanta ahaan jirayna waxay isku beddeleen wax lagu faano. Dalkiina waxaa ka burburay dhammaan wuxuu ku camirnaa, sida: dhismooyinkii, waddooyinkii, garoommadii diyaaradaha, dekedihii, dugsiyadii waxbarashada iyo jaamacaadkii, cusbitaalladii, iyo dhammaan hantidii qaranka oo idil. Waxaa meesha ka baxay waxyaabihii aasaasiga u ahaa nolosha bani'aadamka, sida: Nabadgelyo, cunto, daryeel caafimaad, waxbarasho iyo dhammaan waxyaabaha dhisa sharafta bani'aadamka oo idil, taasina waxay keentay in ay nolosha ciriiri noqoto.

Si kooban haddaan u cabbirno colaadda aan dhammaadka laheyn ee ka taagan Soomaaliya waxaa laga dhaxlay xaalad adag iyo masiibo bulsho taasoo sidii looga soo kaban lahaana ay qaadan karto tobannaan sannadood.

## 1.2. Hadafka iyo ujeeddooyinka AWB

AWB waa hey'ad samafal ah oo aan dheef doon ahayn oo ay aasaaseen dad Soomaaliyeed oo ka yimid madaalada Buulo Burte, waxaana la aasaasay sannadkii 2018kii. Ujeeddada ugu weyn ee loo sameeyayna waa sidii dib loogu soo celin lahaa taariikhdii wanaagsaneyd

ee degmada loona soo nooleyn lahaa kalsoonidii, walaaltinimadii iyo is jacaylkii ka dhexeeyay dadka degmada ka yimid.

Ujeeddooyinka gaar ahaaneedna waxaa ka mid ah:

i. In la abuuro xiriir wanaagsan oo u dhexeeya dadka degmada ka yimid, isla markaana la xoojiyo lana joogteeyo xiriirkaa isaga ah
ii. In wax laga qabto burburka dhaqan-dhaqaale ee ku dhacay degmada, isla markaana la abuuro mashaariic wax ku ool ah oo lagu horumarinayo dhaqanka, dhaqaalaha iyo wax soosaarka degmada

## 2. Maxaa la qabtay

### 2.1 Madasha WhatsApp-ka

Waxaa dhammaadkii sannadkii 2018 kii la furay madal WhatsApp ah oo ay ku kulmaan dadkii kala maqnaa oo kala irdhoobay muddada dheer. Madashan waxaa ku kulansan dad gaaraya 170 qof oo kala jooga dalka gudihiisa iyo dibaddiisa, kuwaasoo isku weydaarsado fikradohooda.

Faa'iidooyinka ugu waaweyn ee laga helay sameynta madasha WhatsApp-ka ee Asxaabta Walaalaha Buulaay waxaa ugu muhiimsan:

- ✓ Inay dad muddo dheer kala maqnaa ay dib u xiriireen
- ✓ Inay dad badani ay si gaar ah xiriir wanaagsan oo joogta ah u sameysteen
- ✓ Inay dad badani magaalada dib ugu xirmeen
- ✓ Inay dad badani ku nafiseen qolka WhatsAppka isla markaana uu noqday goob ay ku sheekeystaan,
- ✓ In dad badan oo dhibaateysan gurmad loo sameeyay oo la caawiyay

### 2.2 Caawinaad dhaqaale oo loo sameeyay dad masaakiin ah oo reer Buulo Burte ah

Ku dhawaad muddo toddoba sannadood ah oo ay hey'addani jirtay waxaa gurmad gaar ah loo sameeyay oo kaalmo lacageed la siiyay dad kor u dhaafaya 20 qofood oo reer Buulo Burte ah, kuwaasoo ku nool meela kala duwan oo ay ka mid ahaayeen daka hoos ku xusan. Isu geynta lacagta loo ururiyay oo lagu caawiayay dadkan waxay gaareysaa 15,000 $ USD ah.

### 2.3 Caawinaad dhaqaale oo loo sameeyay carruur agoon noqotay

Hoorraantii sannadkii 2019kii waxaa magaalada Muqdisho lagu dilay mid ka mid ahaa xubnaha madasha WhatsApp-ka, isla sannadkaa dhammaadkiisii waxaa magaalada Muqdisho ku geeriyooday mid kale oo ka mid ahaa xubnaha madasha WhatsApp-ka, labaduba waxay xubno

firfircoon ka ahaayeen madasha WhatsApp-ka Asxaabta Walaalaha Buulaay. Waxaa loo qaaday xamlad lacag ururin ah sidii loo taageeri lahaa agoontii ay ka tegeen. Waxaa la soo ururiyay lacag 10,000 $ USD waxaana loo kala qeybiyay agoonta labada marxuum.

### 2.4 Mashruuca Afuri walaalkaa sooman ee jooga Buulo Burte

Mashruucani wuxuu ka mid yahay mashaariicda taabba gashay, waa mid joogta ah oo sannad walba la fuliyo, waxaana la billaabay sannadkii 2019 kii. Sannad walba bisha Ramadaan waxaa gagraar loo fidiyaa celcelis ahaan 150 qoys oo masaakiin ah oo ku nool magaalada Buulo Burte. Isugeynta toddoba sannadood waxaa xubnaha madasha WhatsApp-ka iyo dad kale laga ururiyay lacag gaareysa 40,000 $. Lacagtaas oo lagu iibiyay cuntooyin kala duwan oo daruuri ah taasoo la siiyay qoysaska masaakiinta ah si ay bisha Ramadaan cunto nafaqo leh u cunaan (Fiiri shaxda 1). Shaxdu waxay muujineysa, tirada dadka loo fidiyay gargaarka iyo kharashka ku baxay.

Dadka waxaa la siinayay cuntooyin wanaagsan oo kala duwan oo ay ka mid yihiin; bariis, baasto, bur, masaggo, galley, sonkor, saliid iyo timir. Raashika la siinayay qiyaas ahaan wuxuu wuxuu ku filan yahay qoys ka kooban afar qof, bisha Ramadaanka oo idil.

**Shaxda 1:** *Dadka ka faa'ideystay mashruucii afuri walaalkaa 2019—2025*

| Sannadka | Tirada qoysaska la gargaaray | Lacagta ku baxday $ USD |
|---|---|---|
| 2019 | 130 | 5000 |
| 2020 | 140 | 6000 |
| 2021 | 130 | 5500 |
| 2022 | 135 | 5000 |
| 2023 | 150 | 9000 |
| 2024 | 140 | 6000 |
| 2025 | 140 | 5000 |
| **Guud ahaan** | **965** | **41500** |


### 2.5 Mashruuca Xarunta Agoonta Buulo Burte (XAB)

Mashruucan waa kii ugu weynaa ee noociisa ah oo ay Asxaabta Walaalaha Buulaay go'aansadeen inay ka fuliyaan magaalada. Waxaa la filayaa in mashruucan ay ka faa'ideysan doona 500 oo carruur ah oo masaakiin iyo agoon isugu jira, wuxuuna siin doonaa daryeel iyo waxbrasho tayo leh. Mashruuca waxaa la daahfuray bishii Sebtember 2019kii waxaana la dhagax dhigay bishii Luulyo ee sannadkii 2020kii (Fiiri shaxda2). Waxaa qorsheysan in magaalada duleedkeeda laga dhiso xarun weyn oo ka kooban hooy, dugsi, maktabad, goobo loogu tala galay ciyaaraha iyo nashaadka iyo masjid. Mashruucu wuxuu waqtiga fog degmada ku soo kordhin doonaa aqoon

iyo ilbaxnimo cusub, iyadoo ay ardayda ka soo aflaxaysa ay heli doonaan awood ay wax ku qabsadaan dadka kalena ay ku caawiyaan, waxyaabaha qabsoomay:

- Waxaa la isku raacay fikirka mashruuca
- Waxaa la diyaariyay qaabeynta mashruuca iyo naqshadda
- Waxaa la sameeyay daahfur bishii Agoosto 2019
- Waxaa la iibiyay dhulkii lagu fulin lahaa mashruuca oo laga bixiyay 7000 $
- Waxaa la sameeyay waraaqihii milkiyadda
- Waxaa la billaabay lacag ururintii
- Waxaa la yaboohay 29,800 $ USD (39 qof)
- Waxaa la soo uruuriyay (20,770 $ USD)

**Shaxda 2:** *Daahfurkii iyo dhagaxdhiggii Xarunta Agoonta iyo ceel biyoodka*




## 2.6 Mashruuca ceelbiyoodka Xarunta Agoonta Buulo Burte (XAB)

**Daahfurka ceelka:** Maadaama mashruuca xarunta koleejada uu u baahan yahay ceel waxaa muddo dheer la raadinayay sidii ceel looga qodi lahaa xarunta, waxaa la raadiyay ceel riig ah, laakiin lacagta ku bexeysa ayaa aad u badatay. Sidaa daraaddeed waxaa bishii Abriil ee 2024 la go'aansaday in la qodo ceel gacmeed, kaasoo kharashkiisu uu yar yahay. Waxaa loo qoondeeyay lacag dhan 7000—9000 $ USD, waxaana durbadiiba la soo ururiyay lacagtii la qorsheeyay. Waxaana howsha ceel gacmeedka la billaabay bishii Juun 2024 iyadoo daahfurna loo sameeyay. Daah furka waxaa la qabtay taariikhdu markay ahayd 21/06/2024, waxaana ka qeyb qaatay furitaanka howsha dad badan oo ka mid ah dadka degaanka iyo akhyaarta magaalada Buulo Burte (fiiri shaxda 2 iyo 3).

**Shaxda 3:** *Daahfurkii iyo dhagaxdhiggii Xarunta Agoonta iyo ceel biyoodka*




**Miisaaniyadda ku baxday ceelka:** Howsha ceel gacmeedka waa lagu guuleystay, waxaa la soo gabagabeeyay bishii Oktoobar 2024, nasiib wanaag waxaa laga helay biyo macaan (fiiri shaxda 3). Ceelkii wuxuu ku soo aaday xilli abaar ah oo xooliha iyo dadkuba ay si aad ah biyo ugu baahan yihiin. Dadku waxay biyaha ka cabi jireen webiga oo qaarkood ay socdaal dheer u soo gali jireen si ay iyaga iyo xoolohoodaba uga waraabaan. Markii la qiimeeyay baahida dadka degaanka waxaa la go’aansaday in ceelka dadka loo fasaxo, laakiin arrintani ma aha mid bilaash lagu qaban karo, sidaa daraaddeed waxaa la sameyeeyay miisaaniyad loogu talagalay in ceelka lagu socodsiiyo (fiiri shaxda 4). Waxaa la isla gartay in loo baahan yahay qof ceelka ka shaqeeya oo dadka iyo duunyada oomanaha ah waraabiya.ayaa.


Kowdii bishii Oktoobar, xubnaha Asxaabta Walaalaha Buulaay waxay go'aansadeen inay shaqaaleysiisaan laba qof si ay uga qaybqaataan hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan ceelka, si loo hubiyo in shaqada si wanaagsan loo qabto loona dardar galiyo horumarka. Si kastaba ha ahaatee, saddex bilood kadib, markii la qiimeeyay baaxadda iyo culayska shaqada loo baahan yahay, waxaa laisku raacay in aan laba qof loo baahnayn, sidaa daraaddeed waxaa la isku raacay in hal qof oo karti leh uu ku filan yahay inuu si hufan u maareeyo una qabto howlaha muhiimka ah ee la xiriira ceelka, taas oo sidoo kalena keenaysa in kharashaadka la dhimmo lana xakameeyo isticmaalka kheyraadka.

**Shaxda 4:** *Kharashka ku baxay ceelka 2024—2025*

| **Kharashka ku baxay qodidda ceelka 2024** | |
|---|---|
| Isugeynta lacagta ku baxday shaqaalaha qoday ceelka iyo qalabka kale | 9000 |
| **Kharashka ku baxay ceelka bishii Oktober—Desember 2024** | |
| **Tirada waardiyayaasha** | **Kharashka baxay** |
| Laba qof | 2 x 340 x 3 = 1020 $ USD |
| **Kharashka ku baxay ceelka bishii Jannaayo—Desember 2025** | |
| **Tirada waardiyayaasha** | **Kharashka baxay** |
| Laba qof | 12 x 140 = 1680 $ USD |
| Shidaalka | 30 x 12 = 360 $ USD |
| **Total** | **12060 $ USD** |

**Ceelka wuu shaqaynayaa:** Waxaan xiriir la sameynay hey'adda Zamzam Foundation oo ah hay'ad khayri ah, nasiib wanaag waxay nagu caawisay sidii aan u heli lahayn solarka qorraxda ku shaqeeya iyo bambada biyaha soo saarta, taasoo noo sahlaysa inaan helno biyo nadiif ah oo joogto ah. Waxay sidoo kale noo dhiseen qol yar oo lagu xareeyo alaabta ceelka si aan uga hortagno inay wasakhoobaan ama ay lumaan. Intaa waxaa dheer, waxay noo dhiseen barkad biyaha lagu shubo si ay xoolaha uga cabbaan, dadkuna ay uga dhaansan karaan, taas oo kor u qaadaysa noloshooda iyo wax soo saarkooda xoolaha (fiiri shaxda 5). Ceelkani wuauu wax weyn ka beddelay nolosha dadka reer miyiga ah ee degaanka ku nool iyo dadka safarka ahba.

**Shaxda 5:** *Ceelka oo shaqaynayo oo ay dadka iyo xoolaha ooman ka waraabayaan*



## 3. Caqabadaha jira iyo waxyaabaha laga gaabiyay

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn waa iyadoo dadku ay iskaa wax u qabso ku shaqeeyaan, markaa waxaa dhacda mararka qaarkood in howlaha la isku halleeyo, oo aan dadka lala xisaabtami karin maadaama ay shaqadu iskaa wax u qabso ku socoto, taas oo keenta in howlahu noqdaan kuwo aan nidaamsanayn, waxqabadkooduna uu noqdo mid aan la saadaalin karin.

Caqabad kale waa innagoo aan si qorsheysan oo nidaamsan aan u shaqaynaynin, taasina waxay keeneysaa in ay howshu u socoto si gaabis ah, in uu yimaado sku dhex yaac weyn iyo in ay howshu adkaato, taas oo hoos u dhigaysa hiigsiga fog ee laga leeyahay mashruuca iyo tayadaba.

Waxaa kale oo iyana caqabad weyn ah in ay dadkii daaleen gaar ahaan kuwii hormuudka u ahaa shaqada iyo abaabulka

Caqabadaha kale ee waxaa ka mid ah; dadka degaanka oo dhibaatooyin lagala kulmo mararka qaarkood, iyagoo dagaal ku qaadaya qofka ka mas'uulka ah ceelka iyo dhulka xarunta agoonta oo aan si dhab ah loo ogeyn xadkiisa.

## 1. Talooyinka

- Howlaha wanaagsan ee la qabtay waa in la joogteeyaa gaar ahaan barnaamijka Afuri Walaalkaa
- Mashruucan Xarunta Agoonta waa in laga dhigaa mid mirodhal noqda, lana siiyaa mudnaanta koowaad oo si wanaagsan dib la iskugu abaabulo
- In la hagaajiyo nidaamka maamulka, gaar ahaan nidaamka maaliyadda, lana sameeyo diiwaan gelin dhammaan kharashyada baxa iyo lacagta soo gashaba
- In dib loogu noqdo qaabdhismeedka howlwadeennada lana xoojiyo xiriirka iyo wadashaqeynta ka dhexeysa si loo dardargeliyo howsha, isla markaana la xaqiijiyo caawinaadda ay u baahan yihiin oo ay ku jirto mid farsamo
- In la sameeyo qorshe cad oo nidaamsan si loo hubiyo in howlaha si habsami leh u socdaan, lana xakameeyo waxyaabaha khaldan ee keeni kara inay hawlaha noqdaan kuwo aan waxtar lahayn
- In laga fekero sidii loo xadayn lahaa dhulka